

Kaabista Kaalmada Cuntada Degdegga ah Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo

DSHS waxay u direysaa kabitaan degdeg ah dadka helo caawimaada cuntooyinka (EBT). Haddii aad heshay Kaalmo bishii Maarso, waxaad heli doontaa kaalmo dheeraad ah si loobuuxiyo qadartii aad Maarso heli laheed ee loogu talagalay tirada reerkaada

Maxay tani u dhacaysaa?

Golaha Aqalka hoose wuxuu ogolaaday kaalmo dheeri ah si dadka loo siiyo awood ay ugu soo gataan cunto badan. Tani waxay yareeyn doontaa tirada inta jeer ee ay dadka u baahan yihiin inay soo adeegtaan raashin. Waxay sidoo kale xadidi doontaa tirada dadka dukaamada ku jira waxayna hoos udhigeysaa fursadda logu qaadi karo COVID-19.

Goormaan helayaa kaalmada dheeraadka ah?

kaalmooyinka Maarso waxaa lahelayaa Abriil 4.

Ka waran kaalmooyinka Abriil? Ma jiraan isbeddelo ku yimaadda qadartaas?

Haddii aad hore uheleeytid kaalmo Abriil dhexdeeda, waxaad heli doontaa qadarta ugu badan ee loogu talagalay tirada reerkaaga oo ku aadan taarikhada kaalamada caadiga ah, waa hadaadan helin Abriil 1-3. Hadaad hesho Abriil 1-3, waxaad heli doontaa kaalmada dheeriga ah ee Abriil 4.

Ma aanan dalban ilaa Abriil. Maheli doonaa kaalmo dheeraadka ah?

Maheli doontid kaalmo dheeri ah ee Maarso haddii aadan dalbanin illaa Abriil. Laakiin, waxaad heli doontaa qadarta ugu badan ee loogu talagalay tirada reerkaaga haddii la oggolaado bisha Abriil.

Waxaan horeyba uhelaa xaddiga ugu badan ee Maarso ama Abriil. Maheli doonaa dheefaha dheeraadka ah?

Haddii aad hore uheshay qadarta kaalmada ugu badan, ma heli doontid dheef kale Maarso ama Abriil.

Waa maxay qadarta kaalmada ee ugu badan?

Xubnaha reerka ee uqalma	kaalmada ugu badan
1	\$194
2	355
3	509
4	646
5	768
6	921
7	1,018
8	1,164
9	1,310
10	1,456
Mid kasta oo Dheeraad ah	+ 146

Waxaan u qalmaa Cuntada Aasaasiga ah laakiin ma helo wax kaalmo ah. Maheli doonaa kaalmo dheeraadka ah?

Haa. Waxaad heli doontaa kaalmo dheeri ah oo ah qadarta ugu badan ee loogu talagalay tirada reerkaaga haddii aad caadiyan hesho \$ 0.

Waxaan helaa WASHCAP / caawimaada Cuntada Ku-meelgaarka / caawimaada Cuntada loogu talagalay dheefaha sogalootiga sharciga ah. Maheli doonaa kaalmo dheeraadka ah?

Haa. Kaalmada dheeraadka ah waxay khuseeysaa dhammaan barnaamijyada caawimaada cunada.

Waa meeqo kaalmada dheeraad ah ee aan heli doono?

Waxaad heli doontaa farqiga u dhexeeya kaalmadada caadiga ah iyo qadarta ugu badan ee loogu talagalay tirada reerkaaga. Tusaale ahaan:

Adiga iyo lammaanahaada labadiinaba waad shaqeeyaan oo waxaad heshaan wadarta \$ 200 oo ah kaalmooyinka cunnada ah ee 10 ka Maarso. Qadarta ugu badan ee reer laba qof ah waa \$ 355. \$ 355 - \$ 200 waa \$ 155. Waxaad heli doontaa \$ 155 dheeraad ah oo ku aadan kaalmada degdegga ah. Waxaad heli doontaa \$ 200 oo caadi iyo \$ 155 dheeraad ah oo wadarteedu tahay \$ 355 taariikhaada caadiga ah ee bisha Abriil 10

Ma inaan dib u soo celiyaa kaalmadaan?

Kuwani waa kaalmooyin dheeraad ah oo loogu talagalay isticmaalkaaga. Ma jirto sabab keenayso inaad dib ugu soo celiso.

kaalmooyinka dhheeraadka ah miyey saameyn ku yeelan doonaan xaaladdayda socdaalka?

Maya.

DSHS ma bixin donaan qaddarka ugu badan ee bilaha May ama June?

Golaha Aqalka hoose wuxuu ansixiyay Kaalmo dheeri ah bishii Maarso iyo Abril 2020 kaliya. Haddii Golaha Aqalka hoose oggolaado bilooyin dheeraad ah, DSHS waxay bixin donaan kaalmo dheeri ah bilahaas.

Meeqo qof ayaa heli doona kaalmo dheeraad ah?

DSHS waxay siineysaa kaalmo dheeri ah qiyaastii 277,000 qooyo Maarso iyo Abriil.

Waa maxay celceliska lacagta kaalmada dheeraadka ah?

Guud ahaan gobolka, celceliska qaddarka dheeraadka ah ee qoyskiiba waa \$ 155. Qoysaska qaarkood ayaa hela waxbadan, qaarna wax kayar.

DSHS ma ii soo diri doontaa warqad markaan helo kaalmada dheeraadka ah?

Maya. Ma direeyno waraaqo markaan bixinayno kaalmooyinka dheeraadka ah. Haddii aad rabto inaad ogaato goorta ay kaalmadaada soogasho koontadaada, waxaad wici kartaa lambarka ku qoran kaarkaaga EBT si aad u hubiso haraagaaga ama isticmaal koontada kaalmada ee macmiilka www.washingtonconnection.org.

Miyaan wacaa Xarunta xiriirka adeega macmilka?

Sababo laxiriiro tirada wacitaanada oo kabadan maalmaha caadiga ah, waxaan kaa codsaneynaa inaad u wicin xarunta wicitaanka wax ku saabsan kaalmada dheeraadka ah. Kafiiri macluumaadkii ugu dambeeyay bogeena baraha bulshada [Facebook](#) iyo [Twitter](#) ama halkaan www.dshs.wa.gov.